# Warsidaha Nadiifinta Bey'adda ee Hardesty

Dayrta 2014

## Guudmar

Warsidaha Nadiifinta Bey'adda ee Hardesty waa daabacaad ay soosaarto Maamulka Adeegyada Guud ee Maraykanku oo kusaabsan mashruuca bey'eed ee u dhaw dhismihii dawladda dhexe ee hore ee Hardesty iyo goobaha Madaxbannaanida.

Intii uu socday Dagaalkii Labaad ee Adduunku, dhismuhu wuxuu ahaa Kaydka Ciidanka Maraykanka, oo ay ku kaydin jireen agabka milatari iyo dharka askarta ee kiimikada lagu daaweeyey. Muddo kadib, qaar kamid ah kiimikooyinku waxay u gudbeen bey'adda. Goobta hadda waxa ka socda daraasadas bey'eed si loo go'aamiyo nooca iyo heerka dikheeyayaasha ee ay keentay hawlihii hore uga socon jiray.

## Arrinkan dhexdiisa


- Baadhista Bey'eed: Hore, Hadda iyo Mustaqbalka
- Kalfadhiyada Macluumaadka Dadwaynaha ee la Qaban Doono Oktoobar 2014
- Qorshaha ku Lugyeelashada Beesha Sii Daynta GSA
- Noqo Safiir Beeleed
- Macluumaadka La-xariirka




## Baadhista Bey'eed: Hore, Hadda iyo Mustaqbalka

Sannadadii tagay, GGSA iyo qandaraaslayaasheedu waxay fuliyeen kabadan 20 baadhistaan si ay u qiimeeyaan xaaladaha bey'eed ee la xidhiidh Dhismihii Dawladda Dhexe ee Hardesty. Baadhista bey'eed ee hadda ay waddo GSA waxay ahmiyadda siinaysaa dikheeyayaasha biyaha dhulka ee goobta iyo meelaha goobta ka baxdan. Waxyaalaha ka soojeeda waxsoosaarka nadiifin qallaylka iyo shidaalka – oo ay suurogal tahay inay ugu wacan tahay hawlgalladii Dagaalkii Labaad ee Adduunka – ayaa jira, Trichloroethylene (TCE) iyadu waa kiimikada koowaad ee laga warwarsan yahay.

Xogta hordhaca ah ee gu'ga 2013 baadista biyaha dhulku waxay muujisay TCE inay u dhawayd oogada dhulka marka loo sidii hore lagu ogaa xagga waqooyi ee dhismaha. Sidoo kale, Wakaaladda Ilaalinta Bey'eed ee Maraykanku waxay soosaartay heerar baadhis oo aad u adag marka loo eego baadhisihii hore u jiray. Khabiiradan waxay muujiyeen in kasta oo uu isbeddelay qotada TCE iyo sayniska cusub, inayna jirin khatar dhaw oo la og yahay oo ay caafimaadka dadka u leedahay.

Digniin ahaa, GSA iyo qandaraaslaheega bey'eed Terracon Consultants, Inc., waxay baahiyeen muunad ka qaadashada biyaha dhulka ee meesha la deggan yahay ee waqooyiga ka xigta goobta xagaagii 2013. Muunad qaadahada la baahiyey waa sii socotaa maanta, si ay u socoto Qiimaynta Halista Caafimaadka Dadka taasi oo socotay dhawr sannadood.



Marka la eego MDHSS, dariiqada koowaad ee ay dhici karto inay ku soo gaadho TCE dadka meelaha ku dhaw deggan waa iyada oo uumi ah, taasi oo dhacda marka hawo guriga a ma dhismaha gudihiisa ay wasakhaysan kiimiko carrada ama biyaha dhulka ka soo uumi baxday kuwaasi oo ka hooseeya dhismaha. Qiimaynta hore ee MDHSS ee xaaladda Hardesty waxay soojeedisay TCE kujirta biyaha dhulka Hardesty agteeda inay ku uumi baxayn heerar looga biqi karo caafimaadka dadka. Go'aankan waxa la gaadhay iyada oo la isticmaalayo xogta muunadda la qaatay iyo moodhalka cilmiyeed ee ay oggolaatay Waaxdka Missouri u Qaabilsan Khayraadka Dabiiciga ah.

Si loo caddeeyo moodhalka cilmiyeed, GSA waxay baadhay laba guri oo waqooyi ka xiga dhismaha si loo ogaado inuu uumi soo gaadhay Ogosto iyo Sibtambar 2014. Heerka uumiga TCE hoosta – maya gudaha – guryaha midkood wuu ka sarreeyey waxa moodhalka cilmiyeed saadaaliyey. In kasta ooyna tani ayna ku ahayn khatar dhaw caafimaadka dadka meesha deggan, GSA iyo rafiiqyadeedu waxay hadda la shaqeeyaan mulkiilayaasha kale ee guryaha waqooyi ka xiga dhismaha si loo hubiyo dadka meesha deggan inayna halis ugu jirin uumiga oo soo gaadha. Baadhitaanadan waxa la fulin doonaa dhawrka bilood ee soo socda, GSA-na waxay la wadaagi doontaa natiijooyinka iyo qiimaynta caafimaadka dadka beesha marka ay diyaar noqdaan.

## Kalfadhiga Macluumaadka Dadwaynaha oo la Qabanayo Oktoobar 29

Hel natiijooyinka muunad qaadista iyo macluumaadka kusaabsan mashruuca bey'adda Hardesty ee Kalfadhiga Macluumaadka Dadwaynaha soo socda.

**Taariikhda:** Arbaca, Oktoobar 29

**Wakhtiga:** 5-7 g.d.

**Goobta:** North-East KC Library
6000 Wilson Road
Kansas City, MO 64123



Maamulka Adeegyada Guud (General Services Administration)

## Kalfadhiga Macluumaadka Dadwaynaha (sii socda)

Waxa jiri doonta soo jeedin 6 g.d. oo kusaabsan muunad qaadashada bey'eed ee hadda kahor, tallaabooyinka xiga ee habka nadiifinta, iyo fursadaha ku lugyeelashada dadwaynaha go'aan qaadashada. Wakiilada ka socda GSA, MDNR, MDHSS, KCHD, EPA, shirkadda injineeriyadda bey'eed Terracon Consultants, iyo mulkiilaha hadda ee Soo-noolaynta Hardesty waxay joogi doonaan maktabadda galabtii dhan si ay uga jawaabaan su'aalo kana xaajoodaan mashruuca.

Tarjumaano Isbaanish iyo Fiidnaamiis ah ayaa goobta joogi doona, waxyaalaha daabacanna waxa lagu heli doonaa Ingiriisi, Isbaanish, Fiitnaamis iyo Soomaali. Fadlan la xidhiidh GSA galaan u yeeladka ama codsiyada isgaadhsiinta.

Ku soo biir wakaaladaha Oktoobar 29 si aad wax uga ogaato shaqada ka socota beeshaada dhexdeeda!

## Noqo Safiir Beeleed

GSA waxay raadinaysaa dhawr xubnood oo beesha kamid ah si ay u caawiso hoggaanka Waqooyiga Bari ee Magaalada Kansas iyada oo u maraysa mashruuca bey'eed ee Hardesty. Ma jeceshahay caawinta jaarkaaga? Ma rabtaa inaad noqota ka ugu horreeya ee wax ka ogaada horumarrada mashruuca nadiifinta bey'eed? Safiirka Beesha ayey dhici kartaa inuu yahay door aad kuugu fiican!

Safiir Beeleed ahaan, waxaad:

- Noqon doontaa xidhiidhiye beesha iyo dawladda;
- Heli doontaa wixii cusub ee GSA ka yimaada si aad ula wadaagto saaxiibada, jaararka, kiniisadda, shaqo-wadaagta, iyo kooxaha isboortiga, iyo cid kasta oo ku nool ama ka shaqaysa meesha;
- Ugu shaqayn beeshaa door hoggaamin oo iskaanimo ah;
- Ku boorin shabakaddaada inay xaadiraan kulamada oo ay isdhaafsadaan afkaarta;
- U gudbin afkarta, tabashooyinka, baahiyaha iyo su'aalaha jaararkaaga GSA; oo
- Ka ciyaari qayb muhiim ah wada xaajoodyada iyo go'aan qaadashada, adiga u doodaya beeshaa.



Macluumaad dheeraad ah ama si aad ugu mutadawacdo inaad noqoto Safiirka Beesha Mashruuca Bey'eed ee Hardesty, xaadir Kalfadhiga Macluumaadka Dadwayne ee Oktoobar 29 ama la xidhiidh GSA (816) 926-6903 ama r6environment@gsa.gov, attn: Leslie LaMar.

## Macluumaadka La-xiriir

Kooxda Hardesty ee GSA
(816) 926-6903; r6environment@gsa.gov

Sarkaalka Arrimaha Dadwaynaha GSA Angela Brees
(816) 823-2931; angela.brees@gsa.gov

Khabiirka Bey'eed ee MDNR Jim Harris
(573) 522-1892; jim.harris@dnr.mo.gov

Qiimeeyaha Halista MDHSS Michelle Hartman
(573) 751-6102; michelle.hartman@health.mo.gov

Agaasime Ku-xigeenka KCHD Bert Malone
(816) 513-6166; bert.malone@kcmo.org

Macluumaadka dib-u-dhiska goobta, la xidhiidh mulkiilaha hadda ee Shirkadda Hardesty Renaissance Economic Development Corporation. 425 Washington St., Suite 410, Kansas City, MO 64105.

## GSA Waxay Fasaxday Qorshaha ku Lugyeelashada Beesha

Xal u helista bey'eed wuxuu noqon karaa hawl dheer oo adag, sidaa darted GSA waxay abuurtay Qorshaha ku Lugyeelashada Beesha (CIP) si kuu wargeliso kuuna siiso fursado aad ku lugyeelato go'aan qaadashada.

Qorshuhu wuxuu sharxayaa habka nadiifinta bey'eed, wuxuu sharxayaa ahdaaafta ku lugyeelashada beeleed ee GSA, wuxuuna iftiiminayaa hawlaha gaadhista dadwaynaha oo qorshaysan. CIP sidoo kale waxay ka xaajootaa taariikhda bey'eed ee dhismaha dawladda dhexe ee hore iyo sifooyinka iyo tabashooyinka beesha.

Waxaad ka arki kartaa qorshaha Oktoobar 29 Kalfadhiga Macluumaadka Dadwaynaha, oo ka dhacaya North-East Kansas City Library, onlayn http://gsa.gov/hardesty

## Xarfaha Magacyada loo soo Gaabiyey (Acronyms)

GSA – Maamulka Adeegyada Guud ee Maraykanka
MDNR – Waaxda Khayraadka Dabiiciga ah ee Missouri
MDHSS – Waaxda Missouri ee Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka Da'da ah
KCHD – Waaxda Caafiamadka Magaalada Kansas
EPA – Wakaaladda Ilaalinta Bey'eed
TCE – Trichloroethylene
CIP – Qorshaha ku Lugyeelashada Beesha

## Wadaag Jawaabcelintaada

Wadaag jawaabcelintaada warsidahan ama mawduucyada bey'eed ee kale ee Hardesty kalfadhiga dadwaynaha ama adiga oo la xidhiidha si toos ah GSA (816) 926-6903 ama r6environment@gsa.gov.

Macluumaad dheeraad ah, booqo
http://gsa.gov/hardesty
http://dnr.mo.gov/env/hwp/fedfac/hardesty.htm